

(hadda laga bilaabo Maarso 12, 2021)

## Waa maxey Cayr Qaadashadu?

“Cayr-qaadashadu” waxa ay quseeysaa muhaajiriinta soo degaya wadanka US ka, iyo sidoo kale qaar ka mid ah muhaajiriinta wadanka US ka horey u joogay, ee codsanaya degaanaashaha rasmiga ah (green card) markii ugu horeeysay. Cayr -aadashadu waxa ay go'aamisaa in qofka sharci laga siiyo wadanka iyo in kale iyadoo marka hore la go'aansanayo inay u baahnaan doonaan muqtaqbalka inay helaan manfacyada dowlada iyo kale. Sannadkii 2019, Maamulkii madaxweynihii hore ee Trump waxa uu isku dayey inuu ka dhigo xeerarka qaabilsan cayr-qaadidka mid adag. Hay'ada USCIS ee Madaxweyne Biden iyo hay'ada Amaanka Dhulka Hooyo (Homeland Security) waxa ay ku dhawaaqeen inaysan isticmaali doonin xeerarkii hore ee Madaxweyne Trump ee qaadashada cayrta quseeyey.

Taa macnaheedu waa in hay'ada USCIS ay kaliya u xisaabinayso qaar uun sida gargaarada lacagta cadaanka ah (SSI, MFIP and GA) iyo Medicaid ka haynta goobaha dadka waaweyn lagu hayo kolka cidi ay codsanayso degaansho rasmi ah (green card) markii ugu horeeysay. **Ogow:** dadka aan sharciga deganaanshaha rasmiga ah (green card) lahayn lama siiyo manfacyadaa iyaga kolnaba. Maamulkii Madaxweyne hore ee Trump waxa uu isku dayey in xisaabta xeerarka cayr-qaadashada lagu daro cuntada, ggargaarka guryaha, kaararka caafimaad ee dowlada, laakiin hadda kuwaa xisaabta **laguma daro**.

Waydii qareen manfacyada adiga ama qoyskaagu aad heli kartaan, iyo in xeerka cayr qaadashadu uu idin quseeyo iyo in kale. Gargaarka dhanka Sharcigu (Legal Aid) **waa mid qarsoodi yo bilaashba ah.**



**Mid-MN Legal Aid: (800) 292-4150**  
**(9:00 am - 4:00 pm)**

[www.lawhelpmn.org/so](http://www.lawhelpmn.org/so)